

2011 DUGSI XIRID IYO FIDIN**Taageero qoysaska dugsiyada ay xiridu saameysay**

Xiridda dugsiyada iyo isku-darkoodu waa ku adadg tahay qof kasta, hase ahaatee waa talaabo loo baahan yahay si loo dhiso nidaam dugsiyeedka tayada sare leh ee ilmaheennu u-qalmaan. Sidaada oo kale, waxaannu ilamahaaga u-rabnaa waxa ugu fiican. Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxa ka go'an iney ku taageeraan adiga inta aad baroosaskan mareyso iyadoo lagu siinayo siminaaro macluumaad ah, la-talin xagga doorasho dugsi iyo booqashooyin gaar ah ee dugsiyada cusub. Waxaad nagu heli kartaa talafoon, email, iyo qof ahaanba. Waxaannu qiimeyneynaa doorashadaada PBS oo waannu ku taageeri doonaa xilligan kala guurka ah.



*Niyad-samaan,
Carol R. Johnson
Agaasimaha Guud*

Ardayda ku jirta dugsiyada la xirayo waxay ka qeyb-qaadan doonaan wareega caadiga ah ee doorashooyinka dugsiyada, kaas oo soconaya min Febraayo 9 illaa Maarso 25 ee fasalad ardayda marka laga reebo xannaanada (kindergarten), fasalka 6 iyo fasalka 9. Inta badan ardayda ay tahay inay bedeshaan dugsi sababtuna ay tahay baroosaska dugsi xiridda, waxay ku dhacayaan qeybtan. Jaaniska ugu wacan ee aad ku heli kartid mid ka mid ah dugsiyada ugu horeeya doorashadaada, waa inaad sameysaa codsigaaga waqtigaas la cayimay oo aad ugu yaraan doorataa shan dugsi. **Ardayda ku jirta dugsiyada la xirayo waxay heli doonaan mudnaanta koowaad in lagu qoro dugsiyada bannaan, marka xeerinta walaalnimada lagu tashado.** BPS waxay bisha Disember qoyskaaga u-diyaarinayaa agabyo gaar ah oo kaa caawin kara baroosaska doorashada:

Siminaaradda Gaarka ah ee Macluumaadka Isbedelka ee Qoyska ee Disember

Siminaaradani waxay adiga kaa caawin doonaan inaad barato kala-doorashooyinkaaga. Iyadoo ay marti-galinayaa Xarumaha Agabyada Qoyska, waxay siminaaradani bixin doonaan macluumaad ku saabsan dugsi kasta oo ku yaalla aaggooda, waxay qiyaasi doonaan inta kusi ee ka bannaan, iyo dugsiyada aad u-doori kartid ilmahaaga. Maamulayaasha iyo madax-dugsiyeedyada ayaa joogi doona siminaar kasta.

Aagga Waqooyi (North Zone): Disember 20, 6-8 galinka-dembe, 75 Malcolm X Blvd., Roxbury
Aagga Galbeed (West Zone): Disember 20, 6-8 gelinka-dembe, 515 Hyde Park Ave., Roslindale
Aagga Bari (East Zone): Disember 21, 6-8 gelinka-dembe, 1216 Dorchester Ave., Dorchester

Shirar Dugsiyeedyada

Koox ka socota xafiiska dhexe ee BPS ayaa shirar ku qaban doona dugsiyada bisha Disember si u-bixiyaan macluumaad ku saabsan taageeradayada qoysaska iyo ardayda oo ka-jawaabaya su'aalaha aad qabtaan.

Booqashooyinka Dugsiyada Cusub

Kiisaska qaarkood, dugsi la xirayo ayaa ku-biiraya dugsi cusub. Ardayda waxa loo garantiigareynayaa kuraas dugsiyada cusub ah, balse waxaad dooran kartaa dugsi kale. BPS waxay ardayda iyo waalidka u-qabanqaabin doontaa booqashooyin si ay u soo arkaan dhismaha, u soo booqdaan fasalada, ula hadlaan macalimiinta oo ula kulmaan maamulaha cusub. Dugsiyada la xirayo qaarkood kuma biirayaan dugsi kale. Shaqaalaha Xaruntayada Agabyada Qoyska waxay kaa caawin doonaan inaad wax ka sii ogaatid doorashooyinkaaga oo waxay kaa caawin karaan jadwalka booqashooyinka dugsiyada kale ee aagaaga Xilliga Fiirsashada Dugsiyada, kaas oo soconaya illaa Janaayo 21.

Xarumaha Agabyada Qoysaska "Operators by Zone"

Qoysaska markasta waa lagu soo dhaweynayaa inay wacaan amase yimaadaan Xarumaha Agabyada Qoysaska si ay ula hadlaan shaqaalaha xagga doorashooyinka dugsiyada cusub iyo sida la isu qoro. Waxaad wici kartaa Xarumaha Agabyada BPS ee xaafaddaada si aad u-sameysato ballan ah xagga la-talinta doorashada dugsiyada. Ballamuhu waxay kuu hubin karaa helidda shaqaale firfircoon oo ka hawl-gala baahiyaaha gaarka ah.

Xarun Waalid Aagga Bari (East Zone FRC): 617-635-8015 1216 Dorchester Ave., Dorchester
Xarun Waalid Aagga Waqooyi (North Zone FRC): 617-635-9010 75 Malcolm X Blvd, Roxbury
Xarun Waalid Aagga Galbeed (West Zone FRC): 617-635-8040 515 Hyde Park Ave., Roslindale